

Waraaqda Xaqiiqooyinka Xeerka Cuntada #8

Waxa loo baahan yahay in aad ka ogaato Xeerka

WWW.HEALTHOREGON.ORG
/FOODSAFETY

Boqoshaaga Duurka ka baxa

OAR 333-150-0000, CUTUBKA 3-201.16

(A) Marka laga reebo sida ku cad (B), tilmaanta noocyada boqoshaaga duurka laga keeno waa in ay lahaataa caddayn qoraal ah oo iibsadaha loogu tala galay taasoo la rabo in ay diyaar ku ahaato goobta cuntada ugu yaraan 90 maalmood laga bilaabo taariikhda iibka ama adeegga. ^{Pf} Caddayntaan qoraalka ah waa in ay ku jiraan:

(1) Tilmaanta ayada oo la adeegsanayo magaca sayniseedka iyo magaca guud ee noocyada boqoshaaga; ^{Pf}

(2) Tilmaanta marka uu cusub yahay; ^{Pf}

(3) Magaca iyo macluumaadka xiriirka qofka tilmaamay boqoshaaga iyo iibiyaha boqoshaaga; ^{Pf} iyo

(4) Warbixin ku saabsan aqoonta iyo tababarka qofka tilmaamaya, khaasatan mid la xiriirta tilmaamidda boqoshaaga. ^{Pf}

(B) Sadarka (A) ee 3-201.16 ma khusayso noocyada boqoshaaga duurka laga beerto kuwaas oo lagu koriyo, lagu goosto, laguna diyaariyo howl ay maamusho wakaalad dhan-ka sharciga cuntada ah taasoo sharci u leh howshaas.

(C) Goobta cuntada ee iibinaysa, isticmaalaysa ama qaybinaysa boqoshaaga duurka laga soo guray waa in ay xaqiijisaa in boqoshaaga si cad loogu tilmaamo ayada oo la adeegsanayo summad, calaamad ku dhagan, ama qoraal macluumaad guud ah kaasoo sheegaya:

(1) Magaca guud ee caadiga ah ee boqoshaaga; ^{Pf} iyo

(2) Qoraalka ah “Boqoshaaga Duurka ka baxa: ma ahan waxsoosaar la baaray”. ^{Pf}

SABABAHA LA XIRIIRA CAAFIMAADKA BULSHADA:

In ka badan 5000 oo nooc oo boqosha ah ayaa si dabiici ah uga baxa Waqooyiga Ameerika. Inta ugu badan marna lagama helin wax sun ah. Waxaa la ogyahay in ku dhawaad 15 nooc ay yihiin kuwo wax dila 60 kalena ay sun u yihiin bini'aadanka haddii ayaka oo cayriin ah la cuno iyo haddii la kariyaba. Qaar kamid ah boqoshaaga duurka ka baxa oo aad sun u ah ayaa laga yaabaa in ay adkaato in laga garto noocyada la cuni karo. Haddii goobta cuntadu go'aansato in ay iibiso boqoshaaga duurka ka baxa, maamulku waa in uu xaqiijiyaa in boqoshaaga duurka laga soo guray il badqabta.

Gudaha Oregon, suuqa boqoshaaga duurka laga soo guray aad ayuu u kordhay ayada oo ay sabab u tahay soo shaac bixidda isticmaal-ka waxyaabaha cuntada lagu daro ee cusub, ee maxaliga ah. Si kasta-ba ha ahaatee, qaar kamid ah boqoshaaga duurka ka baxa oo aad sun u ah ayaa laga yaabaa in ay adkaato in laga garto noocyada la cuni karo. Goobta adeegga cuntada ee ka iibsanaysa boqoshaaga duurka ilaha aan ganacsiga ahayn waa in ay garataa ayna wax ka qabataa baahida loo qabo barnaamij tilmaan oo macquul ah si ay u bixiso boqoshaaga duurka oo badqaba.

Shuruucda Fayadhowrka Cuntada Oregon waxay shardi ka dhigayaan tilmaamaha noocyada boqoshaaga duurka laga soo guro in ay lahaadaan tilmaamaha iibsadaha ee qoraalka ah ee soo socda:

- Tilmaanta noocyada boqoshaaga ayada oo la adeegsanayo magac sayniseedka iyo magaca guud
 - Boqoshaaga waa in la tilmaamaa inta uu cusub yahay (aan la diyaarin ama la qalajin)
 - Magaca(yada) iyo macluumaadka xiriirka qofka tilmaamay boqoshaaga iyo iibiyaha boqoshaaga
 - Warbixin ku saabsan aqoonta iyo tababarka qofka tilmaamaya, khaasatan mid la xiriirta tilmaamidda boqoshaaga
- Tilmaamahaan qoran waa in ay

diyaar ku ahaadaan goobta cuntada ugu yaraan 90 maalmood laga bilaabo taariikhda iibka ama adeegga.

Goobta cuntada ee qaybinaysa boqoshaaga duurka laga soo guray waa in ay xaqiijisaa in boqoshaaga si cad loogu tilmaamo ayada oo la adeegsanayo summad, calaamad ku dhagan, ama qoraal macluumaad guud ah:



Golden Chanterelle (*Cantharellus cibarius*)

- (1) Magaca guud iyo kan caadiga ah ee boqoshaaga; iyo
- (2) Qoraalka ah “Boqoshaaga Duurka ka baxa: ma ahan waxsoosaar la baaray”.